Ontario

Wasaaradda

KOR U DHISKA ONTARIO

War Saxaafadeed

Miisaaniyadda 2015 Ayaa Ku Samaynaysa Kaabayaasha Maalgalintii Ugu Waynayd ee Taariikhda Ontario

Dowladda Ayaa Kor u Dhisaysa Ontario, Kobcinaysana Dhaqaalaha oo Abuuraysa Shaqooyin

Abriil 23, 2015

Wasiirka Maaliyadda Charles Sousa ayaa maanta sii daayay *Miisaaniyadda 2015*, iyada oo ay taasi suurto galinayso maalgashi kaabayaal aan noociisa hore loo arag si loogu taageero kobca koritaanka dhaqaalaha iyo shaqooyinka cusub.

Miisaaniyadda ayaa fulinaysa ballanqaadkii dowladda ee ahayd sidii loo heli lahaa habab ka fiican sidii hore oo loo kobciyo dhaqaalaha isla marka la ilaalinayo adeegyada dadwaynaha lama huraanka ah ee qoysaska iyo beeluhu ku tiirsan yihiin. Taas waxa ka mid ah kordhinta qiimaha hantida gobolka si loogu taageero maalgelinta ugu wayn ee kaabayaasha taariikhda Ontario soo marta.

Gobolka ayaa waliba soo bandhigaya ku iibinta biirta dukaamada cuntada si loo kordiyo arrimo u habboonaanta iyo wax kala doorbidka macaamiisha isla marka la ilaalinayo u heellanaanta adag ee Ontario ay u leedahay xil bulsheedka.

Ontario ayaa saadaalinaysa difisid ah $ 8.5 bilyan gudaha 2015-16, in ka yarna ah saadaashii *Miisaaniyaddii 2014*, oo noqonaysa heerkii ugu hooseeyay tan iyo bilowgii dhaqaale hoos u dhicii caalamiga ahaa. Gobolka ayaa ku sii wadi doonaa in loo qaato jidka isku-dheellitiritaanka hab abbaar u fiirsi iyo taxaddar leh, marka loo saadaaliyay difisid $4.8 billion ah gudaha 2016-17 iyo ku soo noqosho dheellitir illaa 2017-18. Qorshaha afar-qayboodka ah ee dowladda ayaa kor u dhisaya Ontario iyada oo la maalgashado hibooyinka iyo xirfadaha dadka, iyada oo la dhiso kaabayaasha bulshada sida waddooyinka iyo gaadiidka dadwaynaha, lana abuuro xaalad firfircooni iyo casrinimo leh oo meheraddu ku korto; iyo samaynta qorshe u kaydis hawlgabnimo xasilloon.

Kor u Dhisidda Kaabayaasha Ontario

Cusboonaysiinta iyo ballaarinta kaabayaasha dawladda ayaa taageerta warshadaha Ontario ee, abuuraya shaqooyin iyo jagooyin si ay Ontario si fiican ugu tartanto dhaqaalaha caalamka, iyada oo lala kulmo baahida waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo waddooyinka iyo gaadiidka mustaqbalka. Markay Ontario wax maalgalinayso, wax ayay dhisaysaa — oo markay wax dhisaysana, way koraysaa. *Miisaaniyadda 2015* ayaa ku sii soconaysa oo fidinaysa qorshaha Ontario ee lagu samaynayo maalgashi noociisa hore aan loo arag oo ka badan $130 bilyan kaabyaasha dadwaynaha in muddo 10 sano ah. Taas waxa ka mid ah:

- U kordhin fuundooyinka loo qoondeeyay Horumarinta Ontario (Moving Ontario Forward) illaa $2.6 bilyan, oo wadar ahaan ah $31.5 bilyan illaa 10 sano — illaa $16 bilyan oo ah mashaariic gaadiid dadwayne (transit) Maagaalo Waynta Aagga Toronto iyo Hamilton (GTHA); iyo Illaa $15 bilyan oo ah mashaariic gaadiid iyo mashaariicda kale ee u mudnaanta leh ee ka baxsan GTHA. Koradhka waxa keenaya natiijada sare ee laga helo qorshaha kordhinta hantida gobolka; iyo

- Maalgashi kaabayaasha la qorsheeyay oo ah $11.9 bilyan gudaha 2015-16 sida waddooyinka, buundooyinka, gaadiidka dadwaynaha, nidaamyada biyaha, isbitaallada iyo dugsiyada.

Dawladda ayaa ku dhaqaaqaysa qorshe oodda lagaga qaadayo qiimaha hantideeda oo dib loogu maalgaliyo wadar ahaan faa'iidada ka soo baxda iyada oo loo maro Trillium Trust gaadiidka dadwaynaha,

mashaariicda kale ee gaadiidka iyo kaabayaasha u mudnaanta leh si loo xoojiyo dhaqaalaha Ontario oo loo dhiirigeliyo shaqo abuurista. Kordhinta lacagaha loo qoondeeyay Horumarinta Ontario (Moving Ontario Forward) ayaa dardar galin doonta mashaariicda u mudnaanta leh oo karti ugu yeeli doonta inay mashaariic cusubi ku soo biiraan. Qorshaha kordhinta hantida waxa ka mid ah:

- Fidinta lahaanta Hydro One si loo abuuro dheefo dadwayne iyo dhowritaano dadwayne iyo saami-bixiye sii socod leh oo waara.

- Dib ugu fiirsiga tirada hantida ma-guurtada ah ee meelaha qiimaha badan ku yaal ee la iibinayo.

La Shaqaynta Meheradda Si Loo Abuuro Shaqooyin

Ontario ayaa ku sii wadda abuuritaanka shaqooyin ku filnaan iyo lacag bixin sare leh. Shaqooyinka ayaa si xoog leh uga soo kabtay bartii ugu hoosaysay ee dhaqaale hoos u dhicii Juun 2009, iyada oo la abuuray nus malyuun shaqooyin cusub ah — saddexii-meeloodba yihiin kuwo laga helay warshadaha bixiya mushqaayadaha celcelis ahaan ka badan kuwa kale. Gobolka ayaa ka badiyay ka soo kabashada dhammaan shaqooyinki la waayay illaa markii u dhaqaalaha caalamku hoos u dhacay. Shaqooyinkan tayada sare leh ayaa bixiya fursado horumar shakhsi isla markay waliba abuurayaan xasillooni dhaqaale oo u xaqiijinaya barwaaqo reer Ontario oo dhan.

Miisaaniyadda 2015 ayaa ku sii wadda dhisidda dhaqaalaha Ontario iyada oo:

- U kordhinaysa fuundaynta illaa 10 sano, Fuundo Shaqooyin iyo Barwaaqo $2.5 bilyan ah oo lagala kaashado meheradaha, kordhin wax-soo-saar, kordhinta casriyaynta, badin wax dhoofin iyo abuuridda shaqooyin. *Miisaaniyadda 2015* ayaa ku dhawaaqaysa in fuundada la kordhin doono wadar ahaan $200 milyan laga bilaabo 2015–16, iyada oo la kordhiyo fuundada illaa $2.7 bilyan illaa muddo ah 10 sano oo la fidinayo qaybta kaymaha.

- In loogu sii wado, wixii ka gudubsan Maarj 2016, taageerada siciraynta korontada warshadeedka waawayn ee waqooyi, oo taagera shaqooyinka iyo taramitaanka caalamiga ah.

- Wax ka qabshada isbeddelka cimilada hadda si loo hubiyo in la yeesho mustaqbal barwaaqo dhaqaale iyo bulsho bashbash ah leh. Ontario ayaa horay ugu sii socon doonta nidaam xaddid iyo kala-beddelasho leh habkeeda siciraynta kaarboonka. Wixii faa'iidooyin ka soo baxa barnaamijka xaddidka iyo kala beddelashada ayaa lagu hagaajin doonaa xagga kuwa ugu mudan ee muhiimka ah ee wax ka taraya siidaynta gaasta aqal-cagaarka.

Soo-saaritaan Xoog Shaqaale oo Aad u Xirfadaysan

Ontario xoggeeda ugu weyni waa dadkeeda. Iyada oo maalgashata dadka maanta oo siisa reer Ontario taageerada ay ugu baahan yihiin sidii ay u heli lahaayeen xirfadaha habboon iyo shaqooyinka habboon, ayay dowladuu dhisaysaa dhaqaalaha xoogga leh ee berrito. Tallaabooyin miisaaniyadda waxa ka mid ah:

- In lagu sii wado horumarinta waxbarashada iyo tababbarka xirfadaha, laga bilaabo xannaanada iyo dugsiga barbaarinta maalin buuxda ah illaa barnaamijyada waxbarashada dugsiga sare ka damabysa iyo barnaamijyada barashada ganacsiga, sida kuwa waxyaabaha casriga leh ay ka midka yihiin barnaamijyada waxbarashada tijaabada waxqabashada leh.

- Maalgalinta Ontario Youth Jobs Strategy (Xeeladda Shaqooyinka Dhalinta Ontario) $250 milyan oo dheeraad ah illaa muddo laba sannadood ah, iyada oo ay taasi ka dhigayso wadarta maalgashiga barnaamijyaynta shaqada dhallinta in ka badan $565 milyan.

- Casriyaynta Barnaamijka Gargaarka Ardayga Ontario (Ontario Student Assistance Program) si loo xoojiyo kaalmada lacageed ee ardayda.

Maaraynta Xilka

Dowladda ayaa ku leh raad xaqiiq leh maamul misaaniyad sannadeedka adag. Laga soo bilaabo 2010–11, gobolka ayaa ku hayay koritaanka celceliska sannadlaha ah ee kharashaynta barnaamijka illaa boqolkiiba 1.5, kana hoosaysa saamiga sicir bararka, iyada oo aan la goyn adeegyada lama huraanka ah.

Miisaaniyadda *2015* ayaa ku kacaysa horumar dheeraad ah ooku wajahan dheelitirka misaaniyad sannadeed iyada oo:

- Ku sii wadda Dib u eegga Barnaamijka, Cusboonaysiinta iyo Beddalka (PRRT), oo ah aasaas ahaan arrimo u abbaar cusub oo qorshayn sannado badan iyo miisaaniyadayn ah. Waa garasho labadaba fursadaha muddada gaaban iyo muddada dheerba ah lagu beddelo barnaamijyada iyo adeegyada, iyo ku kicid wax kala doorbid adag oo lagu joojiyo barnaamijyada aan waxqabada lahayn, aan la xiriirsanayn baahiyada mudnaanta muhiimka leh ama markaa waxa ka dambeeya aan waxtar u lahayn danaha dadwaynaha. Markay ahayd guduhii 2014–15, waxa lagu helay bartilmaameed dhaqaalayn dib u eeg barnaamij $250 milyan ah iyada oo loo maray hindiseyaal dhowr ah oo gartay kuwa waxtar la'aanta ah, kuwa hoos u dhigay ama naaqusay qiimayaasha maamuleed iyaga oo aan wax saamayn ah ku lahayn adeegyada safka hore ah. Bartilmaameedyada dhaqaalayn dib u eeg barnaamij ayaa ah $500 milyan midkood kasta 2015–16, 2016–17 iyo 2017–18.

- Maaraynta koritaanka kharashka barnaamijka muddada dhexdhexaadka ah, ayaa la filayaa in lagu hayo celcelis ahaan boqolkiiba 0.9 inta u dhexeysa 2013–14 iyo 2017–18.

    - Wadarta kharashka qaybaha caafimaadka ayaa la filayaa inay koraan celcelis ahaan boqolkiiba 1.9 sannadkiiba, kharashka qaybaha waxbarashada illaa boqolkiiba 2.0 sannadkii, kharashka qaybaha carruurta iyo adeegyada bulshada boqolkiiba 2.9 sannadkii iyo kharashka qaybaha cadaalladda boqolkii 1.5 sannadkii.

    - Kharashyada qaybaha tacliinta ka dambaysa dugsiga sare iyo tababbarka ayaa badiyaa aan isbeddelin doonin oo kharashayda dhammaan barnaamijyada kale ayaa la filayaa inay hoos ugu dhacaan celcelis ahaan boqolkiiba 5.5 sannadkiiba.

- In lagu sii wado u gorgortanka heshiisyada loo dhan yahay ee Adeegga Dadwaynaha Ontario iyo qaybaha qaab-dhsimeedka miisaaniyad sannadeedka Ontario ee haatan jirta, oo ayna ka mid ahayn fuundayn dheeraad ah oo loogu talagalay u kordhimaha mushqaayadda. U kordhimo kasta oo mushqaayadda caadiga ah waa inay dheellitirto tallaabooyin kale oo ka mid ah fuundaynta haatan ee ay heli karaan si shaqaalaha loogu abuuro heshiis kasbasho eber ah.

    - Laga soo bilaabo Julaay 2012, korodhka mushqaadda lagu gorgortamay ee celceliska sannadlaha ah ee ahaa dhammaan qaybaha dadwaynaha gobolka Ontario ayaa ahaa boqolkiiba 0.6. Taasi wey ka hoosaysaa qaybaha dadwaynaha dawladda hoose ee Ontario ee (boqolkiiba 1.9), qaybaha federaalka ee dadwaynaha Ontario (boqolkiiba 1.7) iyo qaybaha kuwa gaarka loo leeyahay ee Ontario (boqolkiiba 2.0).

- La-dagaalanka dhaqaalaha hoose, oo lagu qiyaaso inuu yahay dhaqdhaqaaq $15 bilyan dhaqaale sannadeed Ontario, si loogu simo miidaanka ganacsiga meheradaha. Gobolka ayaa sidaas guulaysan doona iyada oo loo maro ururin macluumaad iyo falanqayn ka wanaagsan sidii hore, tallaabooyin ka badan oo wax looga qabto tubaakada oo kontarabaanka ah, iyo yaraynta cashuur iska ilaalinta shirkadaha. Gobolka ayaa sidoo kale soo jeedin doona inay ka dhigto isticmaalka, soo saaridda ama qaybinta teknolojiyad xakamayn wax ku iibin elektiroonig sharci-darro.

XIGASHO

"Miisaaniyadda Ontario ee 2015 ayaa ah wax ka sarreeya ka warbixin ku saabsan lacagaha gobolka. Waxay ku saabsan tahay ilaalinta, dhawrista iyo habboonaynta tayada nolosha dadka gobolka oo dhan. Ontario ayaa u diyaar ah inay u hogaamiso Kanada dhaqaalaha casriga ah iyada oo loo maro maalgelinta taariikhiga ah ee kaabayaasha iyo gaadiidka dadwaynaha oo bucshiradaha suuqyada dhakhso u geyn doona oo dadka markay ka imanayaan shaqada u geyn doona guriga si badbaado leh laakiin Ontario tartankeeda iyo wax soo saarkeed kan badin doona.

Miisaaniyaddani waxay qeexaysaa qorshahayaga in la maalgashdo xirfadaha iyo tababbaritaanka dadka, inay taageeraan jawi ganacsi firfircoon oo tartan leh, kobciyaan hawlgab xasilloon oo ay maareeyaan kharashaynta barnaamijkayaga. Ontario ayaa jidka toosan ugu jirta inay dheellitirto miisaaniyadda illaa 2017-18, oo waxaan sidaas ku samayn doonaa hab u yahay ah labada xaq iyo mas'uul."

— Charles Sousa, Wasiirka Maaliyadda (Minister of Finance)

XAQIIQOOYIN DHAKHSO LEH

Inta ugu badan saadaaliyeyaasha qaybaha dhaqaale ee gaarka loo leeyahay ayaa saadaalinaya in dhaqaalaha Ontario u ka mid noqon doono kuwo horseed ka ah koritaanka gobolka labada sano ee soo socda.

- Dowladda ayaa bixisay in ka badan $1.3 bilyan oo deeq iyo deynba ah gudihii 2013–14, iyada oo caawisay in ka badan 380,000 arday.
- Isku-xirnaanta Shaqada Ontario (Employment Ontario) ayaa caawisay qiyaastii hal milyan oo reer Ontario ah gudihii 2013–14, oo ay ku jiraan in ka badan 150,000 loo-shaqeeyeyaal ka soo jeeda Ontario oo dhan.
- Markay ahayd Juun 1, 2014, mushqaayadda ugu yaraanta saacaddiiba ayaa kor ugu kacday $11. Waxay kor ugu kici doonaa $11.25 gudaha Oktoobar 2015.

WAXYAABO DHEERAAD AH OGOW

Akhriso Misaaniyadda 2015 ee Ontario

Akhriso Qudbadda Misaaniyadda

Akhriso inta ugu muhiimsan ee Misaaniyadda 2015 ee Ontario.

Akhriso sooyaalka macluumaadka ku saabsan Misaaniyadda 2015 ee Ontario:

- Kor u Dhisidda Kaabayaasha Ontario
- La Shaqaynta Meheradda Si Loo Abuuro Shaqooyin
- Soo-saaritaan Xoog Shaqaale oo Aad u Xirfadaysan
- Maalgashiga Bulsho Cadaalad ah looguna talagalay Reer Ontario oo Dhan.

- Hoggaamin Qaran – Ontario Adag, Canada Adag
- Xoojinta Xasiloonaanta Hawlgabka Dhammaan Reer Ontario.
- U Habboonaynta Qiimaha Kor u Dhiska Ontario

Akhri Talooyinka Ugu Dambeeyay ee Guddiga Kala Talinta Hantida Dawladda Madaxa Dawladda

---

LOOGU TALAGALAY WARSIGA WARBAAHINTA KALIYA:
Kelsey Ingram, Xafiiska Wasiirka (Minister's Office), 416-326-1409
Scott Blodgett, Wasaaradda Maaliyadda (Ministry of Finance), 416-325-0324

MARKAY TAHAY WEYDIIMAHA DADWEYNAHA SOO WAC:
1-800-337-7222
TTY: 1-800-263-7776

Ontario.ca/budget
Disponible en français